KING COUNTY
FLOOD CONTROL
DISTRICT

King County
Department of Natural Resources and Parks
Water and Land Resources Division

NOQO MID U DIYAAR AH FATAHAADDA

HAGAHAAGA DIYAARGAROWGA FATAHAADDA EE KING COUNTY

Reagan Dunn
Guddoomiyaha, King County Flood Control District

Diyaar. Adkeysi. Wadajir ah.

Fatahaaddii Green River, Diseembar 2025.
Deyn: King County.

Dayactirka degdegga ah ee Cedar River Trail 3 Revetment ayaa la dhammaystiray intii lagu jiray fatahaaddii Diseembar 2025

MAALGELINTA YAREYNTA KHATARTA FATAHAADDA *EE GUUD AHAAN KING COUNTY*

Fatahaaduhu weligood waxay qayb ka ahaayeen nolosha King County, balse xilligii fatahaadaha ee 2025–2026 wuxuu ina xusuusiyey sida ay wabiyadeennu u noqon karaan kuwo aad u awood badan oo waxyeello weyn geysan karaan. Intii lagu jiray fatahaaddii taariikhiga ahayd ee u dhexaysay 8-da Diseembar ilaa 30-ka Diseembar 2025, waxaa gobolka oo dhan laga diiwaangeliyey dhowr diwaano oo cusub oo fatahaado ah. Waxay ahayd dhacdo fatahaad baaxad weyn oo jiilal badan soo marta, taas oo tijaabisay kaabeyaasheena yareynta khatarta daadadka, nidaamyada gurmadka degdegga ah, iyo bulshooyinkeena.

Si kastaba ha ahaatee, inkastoo fatahaaddu ahayd mid aad u daran, haddana King County ma aysan jirin wax dhimasho ah oo fatahaadda ka dhalatay. Natiijadaasi waxay ka tarjumaysaa dadaalka ay muujiyeen hawlwadeennada gurmadka degdegga ah, dawladaha madaniga ah, deggaanka, iyo tobannaan sano oo shaqo ah oo lagu yareynaayo khatarta fatahaadaha, taas oo ay hoggaaminaysay Degmada Xakamaynta Fatahaadda ee King County (King County Flood Control District, KCFCD) (Degmada).

Tan iyo markii la aasaasay sannadkii 2007, Degmadu waxay in ka badan $623 milyan ku maalgelisay mashaariicda yareynta khatarta fatahaadaha ee ka socda guud ahaan King County. Maalgelintaas waxay gacan ka geysatay dhammaystirka 123 mashriicda loogu talagalay si looga caawiyo dadka, guryaha, ganacsiyada, waddooyinka, dhul-beereedka iyo kaabayaasha dadweynaha inay ka ilaaliyaan fatahaadaha. Laga bilaabo hagaajinada gidaarka biyo reebka iyo dayactirka darbiyada difaaca daadadka ilaa iibsashada guryaha ku yaalla dhulka daadadku saameeyaan, dib-u-soo-celinta dhulka daadadku ku fidaan, iyo mashaariicda guryaha kor loogu qaadayo, dadaalladani waxay xoojiyeen bulshooyinkeena waxayna yareeyeen khatarta daadadka ee ka jirtay guud ahaan degmada.

Kadib fatahaaddii taariikhiga ahayd ee Diseembar 2025, Degmadu waxay si degdeg ah ugu dhaqaaqday si ay u taageerto dadaallada gurmadka degdegga ah iyo soo kabashada. Bishii Febraayo 2026, Degmadu waxay ansixisay ku dhowaad $3 milyan oo loogu talagalay dayactirradii degdegga ahaa ee la dhammaystiray intii lagu jiray dhacdooyinka fatahaadda, iyo sidoo kale $7.3 milyan oo dheeraad ah oo loogu talagalay hawlihii degdegga ahaa ee ka soo kabashada fatahaadda kadib, kuwaas oo la hirgeliyey intii u dhexaysay Janaayo iyo Abriil. Kadib, bishii Abriil, Guddiga Kormeerayaasha Degmadu (District's Board of Supervisors) waxay ansixiyeen wax-ka-beddel labaad ee miisaaniyadda dheeraadka ah, oo ku dhow $42.4 milyan, kaas oo loogu talagalay kharashaadka ka jawaabista daadadka, dayactirka kaabeyaasha, iibsashada guryaha ama dhulalka, hawlaha yareynta khatarta, iyo tallaabooyinka kale ee muhiimka ah ee loo baahan yahay ka hor bilowga xilliga daadadka 2026–2027.

Maalgelintani waa lama huraan, sababtoo ah yareynta khatarta fatahaaduhu waa dadaal joogto ah. Fatahaaddii Diseembar 2025 waxay waxyeello gaarsiisay ku dhowaad 170 xarumood oo yareeya khatarta fatahaadaha oo ku yaalla guud ahaan King County, taas oo muujinaysa muhiimadda ay leedahay dayactirka iyo hagaajinta in ka badan 500 oo xarumood oo yareeya khatarta fatahaadaha kuwaas oo gacan ka geysta ilaalinta bulshooyinkeenna.

Iyadoo Degmadu ay sii waddo dadaallada lagu yareynayo khataraha fatahaadaha, dadka deggaanka ah waxay sidoo kale door muhiim ah ka qaataan ilaalinta naftooda iyo hantidooda. Qoys kasta waa inuu lahaadaa qorshe u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah, iska diiwaangeliyaa digniinaha xaaladaha degdegga ah ee deegaanka, isla markaana la soco xaaladaha fatahaadaha inta lagu jiro duufaannada. Dadka deggaanka deegaanku waa inay sidoo kale nadiifiyaan oo furaan marinnada biyaha iyo dhuumaha biyo-mareennada, ogaadaan waddooyinka daad-gureynta, diyaarsadaan xirmooyinka xaaladaha degdegga ah oo ay ku jiraan agabka muhiimka ah ka hor inta uusan bilaaban xilliga daadadka, isla markaana qaataan caymiska daadadka, xitaa haddii aan lagaaga baahnayn inaad qaadato caymiska daadadka sababtoo ah hantidaadu waxay ku taallaa meel ka baxsan dhulka daadadka 100-ka sano ah.

Fatahaaddu si degdeg ah ayeey u dhici karaan, laakiin u diyaargarowgu wuxuu badbaadiyaa nafaha. Degmada Xakamaynta Fatahaadda ee King County (King County Flood Control District) waxaa weli ka go'an dhisidda bulshooyin ammaan badan oo u adkaysi badan fatahaadaha, iyadoo dadka deggaanka ah ka caawinaysa inay U Diyaar Garowaan Fatahaadaha xilliyada fatahaadaha ee mustaqbalka.

Kormeere, Reagan Dunn
Flood Control District
King County Council, Degmada 9-aad

U DIYAARGARAW FATAHAADA:

KA HOR FATAHAADA

1. OGGOW WAXYEELADAADA

- Hubi in gurigaagu uu kuyaalo dhul kuyaala wabiga agtiis ee bogga **kingcounty.gov/FEMAmap**.

2. LA SOCO

- Soo dejiso **King County ee App-ka Digniinta Fatahaadda** (King County Flood Warning app) si aad ugu hesho xog ku dhowaad-waaqici ah oo ku saabsan xaaladda webiyada iyo cimilada.
- Iska diiwaangeli qoraal bilaash ah ama emayl ahaan digniinta fatahaada ee bogga **kingcounty.gov/FloodAlerts**.
- Wac **Xarunta Digniinta fatahaada (Flood Warning Center) lambarka 206-296-8200** ama **800-945-9263** wixii macluumaadka ugu dambeeyey ee ku saabsan wabiyada iyo fatahaadaha inta lagu jiro duufaannada waaweyn.

App-ka, Digniinta fatahaada, iyo in badan oo laga heli karo boga **kingcounty.gov/Flood**

3. WAXAAD IIBSATAA CAYMISKA FATAHAADAA

- Caymiska guriga caadiga ah ma daboolo waxyeelada ks dhalata fatahaada.
- Siyaasaduhu waxay qaadan karaan 30 maalmood si ay u dhaqan galaan.
- Booqo **floodsmart.gov** ama wac **877-336-2627**.

4. WAXAAD ILAALISAA NAFTAADA IYO QOYSKAAGA

- Cusbooneysii qorshahaaga iyo xirmadaada xaalada degdega ah.
- Ogow waddooyinkaaga laga baxo xaaladaha degdegga oo ku tababaro ka hor inta aysan xaalad degdeg ah dhicin.
- Aqoonso xiriir ka baxsan gobolka si aad u hubiso xaaladaha degdegga ah.

5. ILAALI HANTIDAADA

- U wareejiso gawaarida, qalabka, iyo alaabta qiimaha leh meel sare.
- Ku dheji taangiyada shidaalka oo ku kaydi kiimikooyinka ka sarreeya heerarka fatahaada.
- Ku rakib faalfayaasha hubinta ee dhisida dabinada bulaacadaha si looga hortago kaydinta.
- Haddii roob culus ama fatahaad la saadaaliyo, dhig bacaha ciidda si aad uga hortagto biyaha inay galaan dhismayaasha.

HAGAHA RAAC SIDA AY UGU KALA HOREYSO

Dhowr tallaabo oo fudud ayaa sameyn kara farqiga u dhexeeya badqabka iyo khasaaraha fatahaada. Ka dhig hubinta liiskaan mid fudud la helo, oo la wadaag deriska.

INTA LAGU JIRO

1. DIB U NOQO, YAANAY BIYUHU KU LAQIN

- Weligaa ha kaxeyn ama ha ku dhex socon biyaha fatahaada - 6 inji oo biyo ah ayaa dhulka kugu dhufan kara, iyo 12 inji way qaadi karaan baabuurta badankood.and 12 inches can carry away most cars.

2. RAAC DIGNIINTA XAALADAHA DEGDEGA AH

- Dhegayso warbixinnada cimilada ee deggaanka ah, raadiyaha degdegga ah, ama ALERT King County ee digniinaha guud ee degmada
- La soco warbaahinta amarrada daadgureynta oo isla markiiba ka bax haddii laguu sheego inay sidaas sameeyaan.

3. XIR ADEEGYADA

- Dami korontada, gaaska iyo biyaha isha ugu weyn oo keliya haddii aad si ammaan ah u sameyn karto

4. HADDII AADAN SI AMMAAN AH UGA BIXI KARIN

- Wac 911..
- U wareego meel sare oo leh nalka tooska ah iyo taleefnookaaga gacanta.

KADIB

1. SUG WAX KASTA OO CAD

- Haku soo laaban gurigaaga ama ganacsigaaga ilaa ay saraakiishu sheegaan inay ammaan tahay.
- Biyaha fatahaada waxay qarin karaan waxyeelada qaabdhismeedka, wasakheynta iyo khataraha korontada.

2. HUBI ADEEGYADAADA

- Lahaw xirfadle shati haysta si ay u hubiyaan gaaska, biyaha iyo nidaamyada korantada ka hor intaadan dib u shidin.

3. SI AMMAAN AH U NADIIFI

- Wax ka baro hababka nadiifinta nabdoon ee bogga **kingcounty.gov/PrepareForFlooding**.
- Had iyo jeer xiro galoofyo, kabaha iyo dharka ilaalinta.

4. MACLUUMAADKA DUKUMIINTIGA

- Diiwaangeli calaamadda biyaha ugu sarreeya gudaha iyo dibadda hantidaada.
- Qaado sawirro iyo fiidiyoow dhammaan waxyeelada ka *hor intaadan bilaabin dayactirka.*
- Hayso rasiidhada dayactirka iyo kharashka nadiifinta.
- La xiriir wakiilkaaga caymiska *sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.*

KING COUNTY WAXAY ISTICMAASHAA WAJIYO SI AY U MUUJISO XAALADAHA FATAHAADA WABIGA

WAJIYADA FATAHAADA

SIDA SARE EE WAJIGA YAHAY, BIYAHA BADAN EE KU QULQULAYO WABIYADEENA IYO SIDA AY AAD UGU BADANTAHAY INAAN LA KULANO FATAHAAD.

1 IS DIYAARI

- Wax fatahaad caadi ahaan uma dhacaan.
- Shaqaalaha King County ayaa heegan ah.

2 YAR

- Nabaad guur, waxyeelada fatahaada, iyo wado xiranka ayaa suurtogal ku ah goobaha qaar.
- Xarunta Digniinta Fatahaadda ee King County (King County Flood Warning Center) ayaa furmaysa.
- Shaqaalaha waxaa la helayaa 24 saacadood maalinkii si ay u caawiyaan.

3 DHAXAAD

- Fatahaad oo baaxad kala duwan ayaa dhici karo.
- Xiritaanka wadooyin badan, oo ay ku jiraan jidadka muhiimka ah, ayaa suurtogal ah.
- Xarunta Digniinta Fatahaada (Flood Warning Center) ayaa furan heli kasta.
- Shaqaalaha ilaaliyaha fatahaada ayaa booqdo aagaga u nugul fatahaada oo baaro qaababka xakameynta fatahaada.

4 AAD U DARAN

- Fatahaad daran oo leh biyo si dhaqso ah u socdo.
- Wado xiranka baahsan oo wadooyinka wabiga oo dhan ah.
- Xarunta Digniinta Fatahaada (Flood Warning Center) ayaa furan heli kasta.
- Ilaalida Fatahaada ayaa kordhiyo baaritaanada joogtada ah.
- Qoyaan joogto ah oo badan wuxuu daciifin karaa qaar ka mid ah darbiyada ka hortagga fatahaadaha. Xaaladaha fatahaaddu si degdeg ah ayeey isu beddeli karaan.

.

Booqo **flood.kingcounty.gov** wixii sharaxaad oo faahfaahsan ee xaaladaha waji walboo fatahaada ee South Fork Skykomish, Tolt, Snoqualmie, Cedar, Green, iyo White Rivers iyo Issaquah Creek.

FATAHAADKAAGA & **QALABKA** DEGDEGA AH

Inaad diyaariso sahaydan xaalad kasta oo degdeg ah waxay sameyn kartaa farqiga oo dhan haddii aad u baahan tahay inaad si dhakhso leh uga baxdo ama aad hoy u noqoto. Ku kaydi qalabkaaga sanduuq aan biyuhu lahayn ama boorsada dhabarka ah oo aad si degdeg ah u qaadan karto.

ISGAARSIINTA

- Taleefoonka gacanta oo si buuxda loo dabeeyey oo wato jaajar iyo baytariyada gurmadka / bangiga korontada
- Raadiyowga batriga- ama janareetarka ku shaqeeyo iyo baytariyo dheeraad ah
- Liiska daabacan ee xiriirada muhiimka ah (qoyska, asxaabta, caymiska, adeegyada)
- Nalalka ama nalalka hore ee baytariyada dheeraadka ah wato

CAAFIMAADKA & BADBAADADA

- Xirmada gargaarka degdegga ah (faashadda, tirtirka antiseptic, xanuun baabi'iyaha, galoofyada, maqaska)
- Qeyli si aad gargaar u dalbato
- Dawooyinka la qoro (ugu yaraan 7 maalmood)
- Maaskarada wajiga (N95 ama la tuuri karo)

CUNTO & BIYO

- Ugu yaraan 1 qajacleey oo biyo ah qofkiiba maalintiiba (ugu yaraan 3 maalmood!)
- Cunto aan halaaweynin (alaabta qasacadaysan ee diyaar u ah in la cuno, baararka borotiinka, miraha la qalajiyey)
- Furaha qasacadaha aan koronto ku shaqayn
- Cunto iyo biyo loogu talagalay xayawaankaaga guriga ama xoolahaaga

DOKOMENTIGA & LACAGTA CADAANKA AH

- Nuqulada dukumiintiyada muhiimka ah ee ku jira boorsada aan biyaha gelin (aqoonsi (identification, ID), caymis, macluumaadka bangiga, diiwaanka caafimaadka)
- Kaararka deynta iyo lacag caddaanka ah

DIIRIMAAD, RAAXO, DARYEELKA SHAKHSIGA AH

- Dharka diirran iyo lakabyada (oo ay ku jiraan qalabka roobka!)
- Kabaha/ boodka adag
- Busteyaal ama bacaha hurdada
- Saabuun iyo gacmo nadiifiye
- Nadaafadda shaqsiga iyo sahayda fayadhowrka (burushka ilkaha, dawada ilkaha, tuwaallada qoyan, alaabta nadaafadda haweenka, warqadda musqusha)
- Sheeyada raaxo geliyo ee carruurta (bustaha, buuggaagta, boombalooyinka)

NOCYADA *FATAHAADA* EE KING COUNTY

FATAHAADAHA WABIGA

Roobab culus iyo baraf dhalaalaya ayaa sababa in wabiyada ay kor u kacaan, buux dhaafiyaan oo ay baabi'iyaan janbiyadooda.

FATAHAADA DEGDEGA AH

Roobab xooggan oo lama filaan ah oo ka soo da'a meelaha dhulku ka sarreeyo ayaa sababa in biyo iyo qashin si xawli ah buurta uga soo qulqulaan, taasoo si degdeg ah fatahaad uga dhigta meelaha dhulka hoose.

FATAHAADA XEEBTA

Dabaylo xooggan, kor-u-kacyada biyaha badda ee duufaannada, ama hirar aad u sarreeya ayaa fatahaad ka geysta dhulka xeebaha, waxayna biyaha badda ku qasbaan inay gudaha dhulka u soo gudbaan.

DAADAD MAGAALOOYINKA

Roobab mahiigaan ah ayaa buux dhaafiyay nidaamyada dheecaanka, taasoo keentay in biyaha ay ku soo ururaan waddooyinka iyo hareeraha dhismayaasha.

Ka nadiifi marinnada biyaha roobka qashinka si biyuhu si xor ah ugu qulquli karaan

ILAALI DHULKEENA WABIGA KUYAALA WABIGA AGTIIS IYO **BULSHADEENA**

Fatahaada caafimaadka qaba waa safka ugu horreeya dabiiciga ah ee ka hortagga fatahaada. Dhisidda mas'uuliyada leh iyo daryeelka aagaggan waxay gacan ka geysaneysaa ilaalinta dadka, hantida, iyo deegaanka. Waa kuwan labada siyaabood oo aad ku caawin karto:

1 U DHIS SI FARSAMO LEH

- Haddii hantidaadu ku jirto qorsheda fatahaada, waxaad u baahan tahay ruqsad ku dhowaad mashruuc kasta.
- Dayactirka ama hagaajinta ku kacaya in ka badan 50% qiimaha dhismahaaga waa in la sare u qaadaa ama la caddeeyaa daadadka si loo buuxiyo heerarka amniga.
- Ka hor intaadan bilaabin mashruuc, la xiriir hay'adda oggolaanshaha maxalliga ah ama Waaxda Adeegyada Deegaanka ee **King County Department of Local Services, Permitting Division** ag **206-296-6600** ama **kingcounty.gov/permits.**

2 *ILAALI CAAFIMAADKA DHULKA KUYAALA WABIGA AGTIIS*

- Weligaa ha ku tuurin qashinka, qashinka, ama qashinka dayrka bulaacadaha duufaanka, durdurrada, ama webiyada.
- Qashinka iyo qashinka xayawaanka ku tuur qashinka.
- Xaaq (ha tuubooyin!) waddooyinka, waddooyinka iyo waddooyinka si looga hortago wasakhda inay ku dhaqdo marinnada biyaha.
- Ka dhig marinnada biyaha roobka nadiif si biyuhu si xor ah ugu qulquli karaan.

KHEYRAAD DHEERAAD AH

Si aad u ogaato haddii hantidaadu ay taallo dhul kuyaala wabiga agtiis
kingcounty.gov/FEMAmap or call 206-477-4812

Khayraadka Fatahaadaha ee KCFCD
kingcountyfloodcontrol.org/be-flood-ready

Digniinta Xaalada Degdeg ah ee King County (King County Emergency Alert) *kingcounty.gov/alert*

Bogga Wararka Xaaladaha Degdegga ah ee King County (King County Emergency News Blog) *kcemergency.com*

Digniinta Fatahaadda ee King County (King County Flood Alerts)
206-477-4899 • *kingcounty.gov/flood*

Xarunta Digniinta Fatahaadda ee King County (King County Flood Warning Center) 206-296-8200 ama 800-945-9263

Barnaamijka Hagaajinta Guriyeeynta King County (King County Housing Repair Program)
Maalgelinta hagaajinada guriyeeynta aadka muhiimka u ah ee daqliga hoose, milkiilayaasha guriga ee u qalma. 206-263-9095 • *kingcounty.gov/housingrepair*

Khadka Tooska ah ee Kaalmada 24/7 ee King County Road 206-477-8100

King County Road Alerts *kingcounty.gov/roadalert*

Carqaladaha Gaadiidka Dadweynaha ee Metro (Metro Transit Disruptions) *kingcounty.gov/metro*

Barnaamijka Caymiska Fatahaadda Qaranka (National Flood Insurance Program) 877-336-2627 • *floodsmart.gov*

Public Health Seattle iyo King County ee Dhibaatooyinka Haamaha iyo Ceelasha 206-477-8050

Shaqaalaha Kormeerka Fatahaadaha oo indho-indhayn ka samaynaya Green River, meel ka mid ah darbiga ka hortagga fatahaadaha ee Kent, intii lagu jiray fatahaaddii Diseembar 2025.

KING COUNTY FLOOD CONTROL DISTRICT

516 Third Ave. Room 1200 • Seattle WA 98104
kingcountyfloodcontrol.org

MAXAAN U HELAY BOOSTADDAN?

HANTIDAADU WAXAY KU JIRTAA AMA U DHOW DAHAY DHULK KUYAALA WABIGA AGTIIS WAXAYNA HALIS UGU JIRTAA FATAHAAD.

Ku daabacan warqad dib loo wareshadeeyo. Fadlan dib u warshadeey.

IA

NOQO MID U DIYAAR AH FATAHAADDA

HAGAHAAGA DIYAARGAROWGA FATAHAADDA EE KING COUNTY

For translated brochures, visit kingcounty.gov/PrepareForFlooding or call 206-477-4812.

Para obtener folletos traducidos, visite kingcounty.gov/PrepareForFlooding o llame al 206-477-4812.

若需取得本手冊的翻譯版，請造訪網站 kingcounty.gov/PrepareForFlooding 或致電 **206-477-4812**。

Để xem các tờ rơi đã được dịch, vui lòng truy cập kingcounty.gov/PrepareForFlooding hoặc gọi đến số 206-477-4812.

برای ورق‌های ترجمه‌شده، به kingcounty.gov/PrepareForFlooding مراجعه کنید یا با 206-477-4812 تماس بگیرید.

Чтобы получить перевод брошюр, посетите страницу kingcounty.gov/PrepareForFlooding или позвоните по номеру 206-477-4812.

Buug-yaraha turjuman fadlan booqo kingcounty.gov/PrepareForFlooding ama wac 206-477-4812.

KA WAR HAY

@KCFloodDistrict
@KingCountyDNRP

@KingCountyDNRP

@KCFloodDistrict
@KCDNRP